Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay : https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Juun 28, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS
Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka
Ujeedada: Miisaaniyada ODDS iyo Wararka Heerka Lacageed

Sharci-dejinta Oregon ayaa dhawaan ansixisay miisaaniyada 2021-23, oo ay ku jiraan maalgelin taariikhi ah oo ah dhanka nidaamka naafanimada maskaxda/korriinka. Maalgelintani dhanka shaqaalaha ODDS waxay caawimaad ka geysan doontaa xaqiijinta in aanu haysano nidaam adeeg oo awood leh oo bixiya taageero tayo leh oo la siiyo dadka qaba I/DD.

Miisaaniyada sida sharci ahaan loo ansixiyay ee 2021-23 waxay Dhaqaale Guud oo dhan $1.24 billion u qoondeysay ODDS. Qoondayntani waxay qiyaastii boqolkiiba 20 ka sarreysaa miisaaniyada sida sharci ahaanta ah loo ansixiyay (LAB) ee 2019-21 iyo kororka in ka badan boqolkiiba 10 ee heerarka adeega waqtigan la joogo ee 2021-23 (CSL) ee dhanka wadarta lacagaha.

Maalgelintani waxaa ku jirta dhaqaale dheeraad ah oo loogu talagalay Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed iyo adeeg bixiyayaasha Guryaha Daryeelka Dadka Waayeelka ah Waxaa sidoo kale ku jira heerarka lacageed ee adeeg bixiyaha oo si buuxda loo maalgelinayo oo dhaqan galaya Luulyo 1, 2022. Intaasi waxaa dheer, in aanu haysano oggolaansho aan ku sii wadno kororka ah boqolkiiba 5 ee la xiriira Covid-19 marka la dhaafo Luulyo 1, 2021. Iyada oo la haysto maalgelinta la ansixiyay ee ku jirta miisaaniyada, waxaanu kaasi sidoo kale ku daraynaa koror ah boqolkiiba 3.2. Hadda la joogo, waxaanu filaynaa in kororkaasi uu sii noqdo mid sii jira ilaa aanu u gudbayno noocyada heerarka lacageed oo cusub Luulyo 2022.

Hay'ada adeega tani waxay ka dhigan tahay:

- In kororka ah boqolkiiba 5 ee la xiriira Covid-19 uu sii socon doono ee loogu talagalay adeegyada isla hadaba helaya kororka iyada oo adeegyo dheeraad ah lagu dari doono:
    - Guryaha Dadka Waaweyn Degan yahay 24-ka saacadood
    - Taageerada Hawlaha Maalintii (DSA)
    - Employment Path
    - Tababarka Shaqo
    - Shaqada Koox Yar
    - Discovery
    - Guryaha Carruurtu Degan tahay 24-ka saacadood
    - Children's Foster Care Services
    - Adeegyada Hab-dhaqanka
    - Nolosha La taageero ee Dadka Waaweyn
    - Taageerada Adeeg Bixinta
- Kororka dheeraad ah ee ah boqolkiiba 3.2 ee ku yimiday noocyada heerarka lacageed ee hadda jira waxay sidoo kale khuseeyaan adeegyada kor ku qoran. Kororkani wuxuu dhaqan gali doonaa laga bilaabo Luulyo 1, 2021.
- Iyada oo loogu talagalay adeegyada guriga koox ahaanta loo degan yahay ee carruurta, koror joogto ah oo dhan boqolkiiba 3.08 ayaa sidoo kale dhaqan gali doona Sibtambar 1, 2021 si loo taageero tababarka cusub iyo shuruudaha dhanka wax soo sheegida ee ka tirsan SB 710.
- Maalgelinta buuxda ee loogu talagalay noocyada heerarka lacageed ee cusub waxay bilaabmi doontaa in ay hirgasho Luulyo 1, 2022. Maalgelintani waxay muhiim u tahay wanaajinta tayada nidaamkeena adeeg waxayna keeni doontaa mushaharka Xirfadlaha Taageerada Tooska ah oo sarreeya. Daraasad lagu sameeyay warbixinta Xasiloonida Shaqaalaha NCI ee Oregon oo ay sameysay Oregon Health & Science University (OHSU) ayaa muujiyay isku xirnaan u dhaxeysa mushaharka sareeeya iyo yaraanta dadka shaqada ka tagaya ee Oregon.

ODDS ayaa dhammeystiraysa wax ka beddel lagu sameeyo noocyada heerka lacageed 'rate models'ee guriga koox ahaanta loo degan yahay kaasi oo ku saleysan talooyinka daneeyayaasha. Iyada oo laga jawaabayo jawaab celintani, waxaanu sidoo kale si dhow u fiirin doonaa heerka lacageed ee loogu talagalay hay'adaha bixinaya adeegyada guriga-

dhexdiisa si loo xaqiijiyo in heerka lacageed uu si sax ah uga turjumayo adeegyada la bixiyo ee hoos yimaada qaybtani.

Heerarka lacageed ee cusub waxaa la hirgelin doonaa Luulyo 1, 2022 oo ay la socdaan Adeega Cusub oo Koox ahaaneed oo ay ku jiraan kuwa soo socda:

- Adeegyada guriga koox ahaanta loo degan yahay ee dadka waaweyn
- Adeegyada guriga koox ahaanta loo degan yahay ee carruurta ayaa sii socon doona isaga oo ah nooco heerarka lacageed ee cusub
- Adeegyada taageerada hawlaha maalintii (DSA)
- Adeegyada shaqada
- Shaqaalaha Daryeelka
- Nolosha la taageero
- Gaadiidka aan caafimaadka la xiriirin

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan saameynta heerarka lacageed ee cusub ee loogu talagalay daryeel bixiyayaasha iyo Adeega Koox ahaaneed u leeyihiin dadka ay taageeraan hay'adaha daryeelka bixiya ayaa soo bixi doona Luulyo.

Maalgelintani muhiimka ah waxay saameyn wanaagsan ku yeelan doontaa nolosha qof kasta oo reer Oregon ah oo qaba I/DD. Waxaanu uga mahad celinaynaa Sharci-dejinta muujinta taageerada ay u hayaan shaqaalaha I/DD ee la adeegsanayo miisaaniyadani iyo daneenayaasha iyo u doodayaasha doorkii firfircoonaa ee aad ka qaadateen in tani dhacdo.

Si Daacadnimo leh,

Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.